Washington State Health Care Authority

Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

# Xuquuqaha Caymiska Daryeelka Caafimaadka iyo Masuuliyadaha

**Health Care Coverage Rights and Responsibilities**

## Xuquuqahaaga (waxa khasab nagu ah) ee loogu talogalay dhammaan barnaamijyada caymiska daryeelka caafimaadka

**In aynu kugu caawino in aad akhrisid oona buuxisid dhammaan foomamka la codsaday.** Waxaad kala xiriiri kartaa Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) lambarkan 1-877-501-2233 si aad caawimaad u heshid.

**Ku siino adeego turjubaan afka iyo qoraalka ah** kuwaas oo aan wax lacag ah kuugu fadhinin oona dib u dhac lahayn marka aad la xiriirtid Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ama Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA).

**Ka dhigo macluumaadkaaga shakhsiyeed kuwo sir ah** laakiin waxaynu la wadaagi doonaa macluumaadka qaarkood wakaalado gobol ama dowladeed kale, hay'ado maaliyadeed, iyo qandaraaslayaasha HCA ee loogu talogalay ujeeddooyin u qalmitaan iyo qorid.

**Ku siino fursad aad ku samaysid rafcaan** haddii aadan oggolaanin xadidaada laga sameeyay dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ama Maamulka Daryeelka Caafimaadka midkaas oo saameynaya u qalmitaankaaga aad u qalantid ceymiska caafimaadka, adeegaha iyo taageerooyinka mudada-dheer (LTSS), ama qorshe caafimaad. Haddii aad codsatid rafcaan, kiiskaaga waxaa lagu samayn doonaa muraajaco. Wixii ku saabsan macluumaad khuseeya barnaamijyada Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada, waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Xiriirka Adeega Macamiilka ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada lambarkan 1-877-501-2233 ama soo booqo Xafiiskaaga Adeegaha Jaaliyada deegaanka.

Haddii uu rafcaanku yahay mid loogu talogalay go'aanka kusaabsan caymiska Washington Apple Health, midkaas oo aan laga xalin dhinaca muraajaceeyaha kiiska, waxaa laguu samayn doonaa ballan Maamul Dhagaysi.

**In aynu kuula dhaqano si daacadnimo ah. Midab takoorku waa mid lid ku ah sharciga.** Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka waxay u hoggaansamaan sharciyada xuquuqaha rayidka Dowlada la dabakhi karo mana ku samaynayaan dadka midab takoor ku salaysan jinsiyada, midabka, asalka dhallashada, da'da, naafada, ama galmo. Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka kama saaraan dadka ama ulama dhaqmaan si kala duwanaansho ah oo ku salaysan jinsiyada, midab, asal dhallasho, da', naafonimo, ama galmo.

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka sidoo kale waxay u hoggaansamaan sharciyada gobolka la dabakhi karo mana ku sameeyaan dadka midab takoor ku salaysan caqiido, nooc, muujin nooca qofka ama shakhsiyadiisa ah, jihayn galmo, xaalada guur, diin, looga saaray si sharaf leh xaalada ciidan ama halyeeynimo hore, ama isticmaalida hagid eey tababaran ama adeeg xayawaan la siiyo qof naafo qaba.

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka:

- Waxay siiyaan dadka qaba naafada adeego iyo gar-gaaro si ay noogula xiriiraan si wanaagsan, sida:
  - Turjubaano luuqada indhoolayaasha ah oo aqoon u leh
  - Macluumaad qoran oo qaabab kale ah (far waaweyn, dhagaysi, qaabab qoraalo eliktaroonig ah oo la heli karo, iyo qaabab kale)
- Waxay siiyaan adeego luuqad bilaash ah dadka aan luuqadooda aasaasiga ahi ahayn Ingiriisi, sida:
  - Turjubaano aqoon u leh
  - Macluumaad ku qoran luuqado kale

Haddii aad u baahantahay adeegahaan, la xiriir lambarkan 1-877-501-2233.

Haddii aad aaminsantahay in Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka ay ku guuldaraysteen in ay bixiyaan adeegahaan ama kuu midab takooreen qaab kale, waxaan fayl cabasho u diri kartaa:

- **DSHS**
  ATTN: Constituent Services
  PO Box 45131
  Olympia, WA 98504-5131
  1-800-737-0617
  Faakis: 1-888-338-7410
  **askdshs@dshs.wa.gov**
- **HCA Division of Legal Services**
  ATTN: Compliance Officer
  PO Box 42704
  Olympia, WA 98504-2704
  1-855-682-0787
  Faakis: 1-360-586-9551
  **compliance@hca.wa.gov**

Waxaad fayl cabasho u samayn kartaa si shakhsi ah ama tooska teleefoonka, boosto, faakis, ama iimayl. Haddii aad u baahantahay in laguugu caawiyo samaynta faylka cabashada, Qaybta Adeegaha ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ama Qaybta Adeegaha Sharciyeed ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka ayaa diyaar u ah in ay adiga ku caawiyaan.

Sidoo kale waxaad faylka cabashada xuquuqaha rayidka u diri kartaa Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Banii'aadamka Maraykanka, Xafiiska Xuquuqaha Rayidka qaab ilaktaroonig ah halkan **https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf,** ama boosto ama teleefoon halkan:.

**U.S. Department of Health and Human Services**
200 Independence Avenue SW
Room 509F, HHH Building
Washington, D.C. 20201

1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD).

Foomamka cabasho waxaa laga heli karaa cinwaankan **www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html.**

## Masuuliyadahaaga (waxa khasab kugu ah): ee loogu talogalay dhammaan barnaamijyada caymiska daryeelka caafimaadka

**Lambarka Dammaanada Bulshada iyo Daah ka qaadista Xaalada Socdaalka.** Ayada oo ay jiraan ka reebitaano, waxaa khasab kugu ah in aad bixisid Lambarkaaga Dammaanada Bulshada (SSN) ama lambarkaaga dukumeentiga socdaalka ama qofkale oo kamid ah qoyskaaga midkaas oo doonaya in uu codsado caymis kujirid daryeel caafimaad. Lambarka Dammaanada Bulshada waa mid loo baahanyahay si loo codsado daymaha canshuurta lacagaha caymiska bilaha ah. Waxaan u isticmaalaynaa macluumaadkan si aynu ugu xadidno u qalmitaankaaga ayada oo la xaqiijinayo shakhsiyadaada, dhallashadaada, xaaladaada socdaal, taariikhdaada dhallasho, iyo haddii la heli karo caymis daryeel caafimaad kale.
Lama wadaagayno macluumaadkan wakaalad socdaal kale.

Waa suurtogal in loo codsado caymis kujirid qaar kamid ah xubnaha qoyskaaga, laakiin dadka kale maya. Haddii aadan haysan Lambarka Dammaanada Bulshada ama lambarka dukumeentiga ama baasaboorka safarka ee ay iska leeyihiin dhammaan xubnaha qoyska, kuwa kale weli way codsan karaan wayna heli karaan caymis kujirida. Tusaale ahaan, waxaad u codsan kartaa ilmahaaga xitaa haddii aadan ahayn qof u qalma caymis kujirida. Codsashadu ma ahan mid saamaynaysa xaaladaada socdaalka ama fursadaha aad ku noqonaysid degane ama muwaadin joogto ah.

Sidoo kale waxaa jira qaar kamid ah barnaamijyada Washington Apple Health ee loogu talogalay dadka aanan tusi karin in ay waddanka u joogaan si sharci ah. Laakiin haddii aad dooratid in aadan bixinin Lambarka Dammaanada Bulshada ama lambarka dukumeentiga ama baasaboorka safarka ee uu leeyahay qof qoyskaaga katirsan, waxaynu u baahnaan doonaa in aynu kula socono si aynu u helno macluumaadka kusaabsan dakhliga qofka-aan codsadaha ahayn.
**Haddii laga codsado dhinaca wakaalada**, bixi macluumaad kasta ama caddayn loo baahanyahay si loo go'aansado haddii aad u qalantid iyo haddii kale oo adan u qalmin.

## Waxyaabaha ay khasab kugu tahay in aad oggaatid ee loogu talogalay dhammaan barnaamijyada caymiska daryeelka caafimaadka

**Waxaa jira sharciyo dowladeed iyo gobol gaar ah** kuwaas oo xukuma hawsha Xiriirka Washington iyo nidaamyada codsiga gobolka-ee la muumulay, xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga maadaama aad tahay qof isticmaala ayaga iyo ceymiska aad ayaga isticmaalidooda ka heshid. Marka aad isticmaashid nidaamyadan, waxaad oggolaanaysaa in aad u hoggaansantid sharciyada khuseeya qofka isticmaalaya nidaamyadaas iyo caymis kujirida ay u helaan natiijo ahaan.

**Qaanuunka Qaranka Ee Kusaabsan Isdiiwaan gelinta Coddeeyaha ee 1973** wuxuu uga baahanyahay dhammaan gobolada in ay ka bixiyaan caawimaada isdiiwaan gelinta coddeeyaha tooska xafiisadooda caawimaada dadweynaha. In la codsado isku diiwaangelinta coddeynta ama in la diido ma ahan mid saamayn doonta adeegaha ama dheefaha lagaa siin doono dhinaca wakaaladaasi. Waxaad iska diiwaan gelin kartaa si aad u coddeysid halkan **www.vote.wa.gov** ama dalbo foomamka coddeynta adiga oo waca lambarkan 1-800-448-4881.

**Qaanuunka Masuuliyada iyo Ceymiska Caafimaadka La qaadi karo (HIPAA)** xadadka ka mamnuucaya Maamulka Daryeelka Caafimaadka iyo Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada in ay kala hadlaan macluumaadka caafimaadka ku saabsan adiga iyo xubin kasta oo qoyskaaga ka tirsan in ay cidkale la wadaagaan, ay ku jirto wakiil la oggolaaday, aan ka ahayn haddii uu qofku leeyahay awood qareen ama aad sixiixdid foom oggolaansho oo sheegaya in daaha laga qaado macluumaadkan. Midaan waxaa kamid ah daah ka qaadis macluumaadka caafimaadka maskaxda ah, HIV, AYDHIS, natiijooyin baaritaan Cudurada Galmada la Isaga qaado ah, ama adeego kutiirsanaan kiimiko iyo daaweyn ah.

**Qaanuunka Daryeelka La awoodo** wuxuu ka celinayaa Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka in ay siiyaan macluumaadka aqoonsiga qofka (PII) oo ku saabsan adiga ama xubin kasta oo kamid ah qoyskaaga cidkale oo aan loo oggolaanin in uu qaato, adiga oo aan bixinin oggolaanshahaaga.

**Macluumaadka aad siisid Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka** wuxuu u hoggaansanyahay xaqiijin laga sameeyo dhinaca shaqaalayaasha gobolka iyo dowlada ee loogu talogalay ujeeddooyin xadidaad lagu xadidayo u qalmitaankaaga loogu talogalay ceymiska daryeelka caafimaadka. Xaqiijinta waxaa kamid noqon kara xiriiro lasocosho-ah oo ay sameeyaan shaqaalaha wakaalada.

**Maamulka Daryeelka Caafimaadka iyo Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada masuul kama ahan maaraynta lagu sameeyo qorshahaaga ceymiska caafimaadka.** Sidaha ama qaadaha caymiskaaga caafimaadka ayaa ku siin kara macluumaad baddan ee ku saabsan dheefahaaga. **Haddii aad qabtid su'aalooyin ku saabsan shuruudaha qorshahaaga ceymiska caafimaadka, ay ku jirto dheefaha aad u qalantid, iyo samaynta sheegashada dheefta ama rafcaan ku saabsan diidista dheefaha, waa in aad la xiriirtid sidaha ama qaadaha ceymiska caafimaadkaaga.**

***Waxaad ka codsan kartaa adeego taageero fullin tooska Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS).***

Si aad u heshid codsiga adeegahaan, waxaad gashaa boggaan internetka ah
**www.childsupportonline.wa.gov** ama la xiriir xafiiska Qaybta Taakulaynta Ilmaha ee degmadaada ku yaala.

## Xuquuqahaaga (waxa khasab nagu ah) ee loogu talogalay kaliya Washington Apple Health

**In aynu kuu sharaxno xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga** haddii aad codsatid.

**Kuu oggolaano in aad soo dirtid codsi qayb ah** midkaas oo ay ku qoranyihiin ugu yaraan, magacaaga, cinwaankaaga, iyo sixiixa ama sixiixa wakiilka codsadaha la oggolaaday. Maalinta aynu helno codsiga qaybta ah ayaa ah maalinta codsigaaga, midaas oo dhaqan galaysa marka caymis kujiridaada ay dhaqan gasho. Ma qaadanayno go'aanka ugu dambeeya ee kusaabsan caymis kujiridaada illaa kadib marka aad dhammaysid codsiga.

**Kuu oggolaano in aad soo dirtid codsi ama codsi qayb ah** adiga oo isticmaalaya qaab kasta oo kamid ah kuwa lagu qoray hoosta WAC 182-503-0005.

**U hawl gelino codsigaaga ila markiiba** oona dib uga dhicin wakhtiyada lagu sharxay gudaha WAC 182-503-0060.

**Ku siino 10 maalmood oo maalmaha kalandarka ah** si aad u keentid ama usoo dirtid macluumaadka aynu u baahanahay si aynu u xadidno u qalmitaankaaga. Haddii aad codsatid wakhti dheeri ah, waan ku siin doonaa wakhti dheeri ah. Haddii aadan na siinin macluumaadka ama aad codsatid wakhti dheeri ah, waynu diidi karnaa, xiri karnaa, ama bedeli karnaa caymis kujiridaada daryeelka caafimaadka.

**Ku caawino** haddii aad dhib ku qabtid in aad heshid macluumaad ama caddayn la inooga baahanyahay si aynu u xadidno u qalmitaankaaga. Haddii aynu u baahano dukumeenti adiga lacag kuugu fadhiya, waynu kuu soo diri doonaa waxaana kaa bixin doonaa lacagta.

**Kugu wargelino, xaaladaha badankooda, ugu yaraan 10 maalmood** kahor inta aynaan joojinin caymis kujiridaada daryeelka caafimaadka.

**Kugu siino go'aan qoran,** xaaladaha badankooda, gudaha 45 maalmood. Caymis kujirida daryeelka caafimaadka loogu talogalay xaaladaha naafooyinka qaarkooda waxay qaadan kartaa illaa 60 maalmood. Waxaynu ku bixinaa go'aan qoran ee kusaabsan caafimaadka uurka gudaha 15 maalmood.

**Kuu oggolaano in aad diidid in aad la hadashid** baare haddii aynu anagu baarno kiiskaaga ama xaaladaada. Adiga khasab kuguma ahan in aad soo gelisid gurigaaga wax baare. Waxaad ka codsan kartaa baaraha in uu soo noqdo markale. Codsigaasi ma ahan mid saamaynaya u qalmitaankaaga aad u qalantid caymis kujirida daryeelka caafimaadka.

**Sii wadatid caymiska Washington Apple Health** marka aynu sii go'aansanayno haddii aad u qalantid iyo haddii kale oo aadan u qalmin barnaamij kale ee ah WAC 182-504-0125.

**Ku siino adeego helid siman** sida lagu sharxay gudaha WAC 182-503-0120 haddii aad tahay qof u qalma.

## Xuquuqahaaga (waxa khasab kugu ah) ee loogu talogalay kaliya Washington Apple Health

**Usoo sheegtid isbedelada sida looga baahanyahay** gudaha WAC 182-504-0105 iyo WAC 182-504-0110 gudaha 30 maalmood ee laga joogo isbedelka. Akhrisid warqadaada oggolaanshaha si aad u oggaatid waxa ay yihiin isbedelada ay khasab kugu tahay in aad soo sheegtid.

**Buuxisid cusboonaysiiyooyinka** marka la codsado.

**Bixisid macluumaadka caafimaad bixiyayaasha** loogu baahanyahay si aynu noogu soo diraan biilkooda kusaabsan adeegaha daryeelka caafimaadka.

**Codsatid Caawimaada caafimaadka** haddii aad u qalantid.

**La shaqaysid shaqaalaha Hubsashada Tayada** marka ay midaasi kaa codsadaan.

**Codsatid oona samaysid dadaal macquul ah** si aad u heshid dakhliga dhici kara ee ka yimaada illooyin kale marka aad codsatid ama heshid caymis kujirida Washington Apple Health.

## Waxyaabaha ay khasab kugu tahay in aad oggaatid ee loogu talogalay kaliya Washington Apple Health

**Adiga oo codsada oona qaata Washington Apple Health**, waxaad siinaysaa gobolka Washington dhammaan xuquuqaha lagu helayo taageero caafimaad kasta iyo lacag bixino kasta oo qaybta seddexaad ah ee loogu talogalay daryeelka caafimaadka.

**Wakaaladu waxay la wadaagi kartaa** taariikhda tallaalka ilmahaaga Nidaamka Dabagalka Tallaalka Macluumaadka Shakhsiyeed ee Ilmaha.

**Macluumaadka aad soo sheegtid** waxaa la siin karaa Waaxda Adeegaha iyo Caafimaadka si loo xadido u qalmitaanka iyo dheefaha bileedka ah ee loogu talogalay barnaamijyada sida caymis kujirida daryeelka caafimaadka, caawimaadka lacagta caddaanka ah iyo kabka daryeelka ilmaha.

**Sharci ahaan, Gobolka Washington wuxuu soo celin karaa qiimooyinka lagu bixiyay noocyo gaar ah ee loogu talogalay adeego caafimaad ee ka ahaada gurigaaga ee ah tooska Celinta Guriga (RCW 41.05A.090, RCW 43.20B.080, iyo Cutubka 182-527 WAC)**. Celinta Guriga macnaheedu ma ahan mid dhacda illaa kadib marka aad dhimatid, dhimashada ninkaaga/xaaskaaga nool, oona carruurtaada nool ay da'doodu tahay 21 sanno ama ka wayn. Sidoo kale ma dhacayso haddii ilmo nooli uu yahay indhoole/naafo wakhtiga aad dhimanaysid. Qiimooyinka lasoo celin karo waxaa kamid ah:

- Adeegaha gaarka ah ee muddada-dheer ee Washington Apple Health iyo taageerooyin, haddii aad tahay da'da 55 ama ka wayn wakhtiga aad qaadatay adeegaha;
- Adeegaha gaarka ah ee kaliya-laga maalgeliyay dhinaca gobolka, ayada oo aan la eegaynin da'daada wakhtiga aad qaadatay adeegaha.

Waxaad ka heli kartaa liis ay ku qoranyihiin adeegaha u hoggaansan qiimo celinta hoosta WAC 182-527-2742. Waxaad ka heli kartaa liis ay ku qoranyihiin hantida laga reebay dib u celinta hoosta WAC 182-527-2746.

Gobolka sidoo kale wuxuu samayn karaa fayl rahaan kahor-dhimashada ah ee kusaabsan hantidaada dhabta ah, da' kasta oo aad tahay, haddii aad noqotid qof hay'adeed joogto ah (WAC 182-527-2734). Gobolka wuxuu celin karaa iibinta guriga, ama hantidaada, aan ka ahayn:

- Haddii ninkaaga/xaaskaaga ay ku nooshahay guriga;
- Walaalkaaga ku nool guriga, uu yahay mid kula leh-guriga, oona kasoo baxa shuruudaha qaarkooda.
- Ilmahaagu ku noolyahay guriga, oona yahay mid indhoole/naafo ah; ama
- Ilmahaaga uu ku noolyahay guriga oona ka yaryahay da'da 21.

Waxaad ka heli kartaa liis ay ku qoranyihiin adeegaha ugu hoggaansan qiimo celinta hoosta amaahda kahor-dhimashada ee ku qoran WAC 182-527-2734.

**Waxaa dhici karta in laguugu koobo hal daryeel caafimaad bixiye,** farmashiye, iyo/ama isbitaal haddii aad raadinaysid adeego daryeel caafimaad aan lagama maarmaan ahayn oo ay bixiyaan daryeel bixiyayaal.

Washington State
Health Care Authority

[English] Language assistance services, including interpreters and translation of printed materials, are available free of charge. Call 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Amharic] የቋንቋ እገዛ አገልግሎት፣ አስተርጓሚ እና የሰነዶችን ትርጉም ጨምሮ በነጻ ይገኛል። 1-877-501-2233 (TRS: 711) ይደውሉ።

[Arabic] خدمات المساعدة في اللغات، بما في ذلك المترجمين الفوريين وترجمة المواد المطبوعة، متوفرة مجاناً، اتصل على رقم 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Burmese] ဘာသာပြန်ဆိုသူများနှင့် ထုတ်ပြန်ထားသည့် စာရွက်စာတမ်းများဘာသာပြန်ခြင်းအပါအဝင် ဘာသာစကားအထောက်အကူဝန်ဆောင်မှုများကို အခမဲ့ရရှိနိုင်ပါသည်။ 1-877-501-2233 (TRS: 711) ကိုဖုန်းခေါ်ဆိုပါ။

[Cambodian] សេវាជំនួយភាសា រួមមានទាំងអ្នកបកប្រែផ្ទាល់មាត់ និង ការបកប្រែឯកសារបោះពុម្ព គឺអាចរកបានដោយឥតគិតថ្លៃ។ ហៅទូរស័ព្ទទៅលេខ 1-877-501-2233 (TRS: 711)។

[Chinese] 免费提供语言协助服务，包括口译员和印制资料翻译。请致电 1-877-501-2233 (TRS: 711)。

[Korean] 통역 서비스와 인쇄 자료 번역을 포함한 언어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 1-877-501-2233 (TRS: 711)번으로 전화하십시오.

[Laotian] ການບໍລິການດ້ານພາສາ, ລວມທັງນາຍແປພາສາ ແລະ ການແປເອກະສານທີ່ພິມ, ມີໄວ້ໃຫ້ຟຣີໂດຍບໍ່ຄິດຄ່າ. ໂທຫາເລກ 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Oromo] Tajajilli gargaarsa afaanii, nama afaan hiikuu fi ragaalee maxxanfaman hiikuun, kaffaltii malee ni argattu. 1-877-501-2233 (TRS: 711) irratti bilbilaa.

[Persian] خدمات کمک زبانی، از جمله مترجم شفاهی و ترجمه اسناد و مدارک (مطالب) چاپی، بصورت رایگان ارائه خواهد شد.با شماره 1-877-501-2233 (TRS: 711) تماس بگیرید.

[Punjabi] ਭਾਸ਼ਾ ਸਹਾਇਤਾ ਸੇਵਾਵਾਂ—ਦੁਭਾਸ਼ੀਏ ਅਤੇ ਪ੍ਰਿੰਟ ਕੀਤੀ ਹੋਈ ਸਮੱਗਰੀ ਦੇ ਅੰਨੁਵਾਦ ਸਮੇਤ—ਮੁਫ਼ਤ ਉਪਲੱਬਧ ਹਨ। 1-877-501-2233 (TRS: 711) 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ।

[Romanian] Serviciile de asistență lingvistică, inclusiv cele de interpretariat și de traducere a materialelor imprimate, sunt disponibile gratuit. Apelați 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Russian] Языковая поддержка, в том числе услуги переводчиков и перевод печатных материалов, доступна бесплатно. Позвоните по номеру 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Somali] Adeego caawimaad luuqada ah, ay ku jirto turjubaano afka ah iyo turjumid lagu sameeyo waraaqaha la daabaco, ayaa lagu helayaa lacag la'aan. Wac 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Spanish] Hay servicios de asistencia con idiomas, incluyendo intérpretes y traducción de materiales impresos, disponibles sin costo. Llame al 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Swahili] Huduma za msaada wa lugha, ikiwa ni pamoja na wakalimani na tafsiri ya nyaraka zilizochapishwa, zinapatikana bure bila ya malipo. Piga 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Tagalog] Mga serbisyong tulong sa wika, kabilang ang mga tagapagsalin at pagsasalin ng nakalimbag na mga kagamitan, ay magagamit ng walang bayad. Tumawag sa 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Tigrigna] ተርጎምትን ናይ ዝተፅሓፉ ማተርያላት ትርጉምን ሓዊሱ ናይ ቋንቋ ሓገዝ ግልጋሎት፣ ብዘይ ምንም ክፍሊት ይርከብ። ብ 1-877-501-2233 (TRS: 711) ደውሉ።

[Ukrainian] Мовна підтримка, у тому числі послуги перекладачів та переклад друкованих матеріалів, доступна безкоштовно. Зателефонуйте за номером 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Vietnamese] Các dịch vụ trợ giúp ngôn ngữ, bao gồm thông dịch viên và bản dịch tài liệu in, hiện có miễn phí. Gọi 1-877-501-2233 (TRS: 711).